QALLOOCSAMAYA, LAAKIIN AAN LA JABIN KARIN

Laga soo bilaabo dhicintaankii safmarka karoonafayras iyo samayntii u adkaysiga qalaalasaha ee Finland

FINNISH ACADEMY OF SCIENCE AND LETTERS waxa ay isu keeneen koox khubaro ah oo takhassusyo kala duwan wata si ay usoo jeediyaan ra'yigooda ku wajahaan awooda u adkaysiga qalalaase ee Finland iyagoo ku salaynaya ra'yigooda casharadii laga bartay qalalaasihii safmarka karoonafayras, tanoo ujeedadeedu tahay in la sameeyo Finland xoog ah oo adkaysi leh. Bayaanku waxa uu eegayaa mustaqbalka oo diiradda ma saari doono qaababka kabasho ee dhow oo lagaga soo kabanaayo qalaalasahan hadda taagan.

Qalalaasaha hadda taagani waxa uu qarin karaa qalalaase dhici kara mustaqbalka oo aan muuqan. Intii lagu gudo jiray caqabadaha uu sababay qalalaasaha safmarku, werwerkii ahaa dhanka cimilada iyo deegaankuba waa uu yaraaday, iyagoo ah kuwo aan la odhan karin xidhiidh kuma laha dhacdooyinkan hadda. Isbedello ballaadhan oo dunida ah kuwanoo ah dhanka deegaanka iyo hoyga noolayaasha kala duwan waxa ay khattar ugelin karaan dadka faafitaanka fayrasyada. Joojinta isbeddelka cimilada iyo deegaanka waxa ay mihiim u tahay badqabka dadka, dhaqaalaha iyo dabiicada. Waa inaynu yarayno gaasaska hawada lagu sii daynayo kordhinana nuugayaasha iyo yareeyayaasha kaarboonka ilaa laga gaadhayo isu miisnaanta karboonka hawada galaya iyo ka laga saarayo (carbon neutrality) lana sii wado in hoos loo dhigo gaasta hawada galaysa wixii intaa ka dambeeya.

Heerka waxbarasho ee aadka u fiican ee bulshada Finland iyo kalsoonida ka dhaxaysa dadka Finnish ka ah ayaa u oggolaatay Finland inay ka gudubto qalalaasaha safmarka si guul leh. Waxaa markasta mudan in kor loo qaado joogtaynta sifooyinkaa. Waxaa mihiim ah inla dhiirri geliyo sinnaanta iyo fursadaha loo siman yahay ee bulshada, tanoo sidoo kale macneheedu tahay in muwaadiniintu ay dareemaan in wixii werbixin ah ee cusub la socdaan ra'yigooda iyo soo jeedinohoodana la maqlaayo.

In badan ayaa la sameeyay Finland gudaheeda si loo hubiyo in qofkastaaba uu helo waxa uu u baahan yahay - laakiin helitaanka wixii loo baahan yahay maxkax ahaan ayaa iyaduna sidaa si la mid ah mihiim ah. Ilaalinta badqabka maskaxeed ee dadka waxa ay ka fudaydisaa maaraynta qalalaasaha, waxbarashada iyo farshaxanku door mihiim ah ayaa ay ka ciyaaraan tan. Waxa ay yihiin salka rajada mustaqbal fiican lagu dhisi karo. Waayo aragga iyo halabuurka farshaxanimo waxa ay kordhisaa hal abuurka qofka iyo bulshadaba, tanoo mihiim u ah dhaqaale fiican oo si dhakhso ah uga soo kabta qalaalase.

Wada xidhiidhku waxa uu door mihiim ah ka ciyaaraa u adkeysiga qalalaasaha: xogtu waa inay gaadho muwaadiniin tiro badan, ay ahaato mid caddaan ah lana fahmay. Isdhexgalku waxa uu mihiim u yahay dareenka dadku ay dareemayaan ka mid ahaanshiyaha iyo ka qaybgalka. Deegaanka aynu ku wada xidhiidhno waxa ku dhacay isbeddelo degdeg ah, sii socodka isbeddelaadahanina waa mid la filan karo. Wada xidhiidhku waxa ay tahay in la qorsheeyo iyadoo xaqaa'iqdan maskaxda lagu hayo. Tallaabooyin gaar ah ayaa loo baahan yahay si loo dabar gooyo xogta qaladka ah loona joogteeyo kalsoonida lagu qabo xogta ku salaysan caddaymo iyo cilmi baadhis.

Sawirka: Hanna Koikkalainen / Poikkeustila 2020

BAYAANKU waxa uu mattalayaa aragtida bulshada saynisyahanada ah. Bulshadan madaxa bannaan ee saynisyahanada ahi waxa ay door mihiim ah ku leedahay fahmitaanka qalalaase, ka badbaadistooda iyo dib udhiska bulshada. Inta lagu gudo jiro qalalaasaha safmarka, iskaashiga ka dhexeeya bulshada saynisyahanada ah iyo gobolka waa uu ahaa shaqeeyay oo guul ahaa qaabab badan, laakiin iskaashiga degdegga ah ee ka dhexeeya saynisyahanada la taliyayaasha ah iyo go'aan qaatayaasha, gaar ahaan, waa mid loo baahan yahay in kor loo qaado si loogu diyaar garoobo xaaladaha lama filaanka ah.

Waxaa mihiim ah in cilmi baadhis fiican la joogteeyo tanoo laga samaynayo takhassuyo badan oo kala duwan, waayo waxa jirta macquulnimada ah inay dhacaan qalalaaso dhinacyo kala duwan ah mana saadaalin karna nooca xog ee ugu mihiimsanaan doonta marka wakhtigaasi yimaado. Waxa aynu ognahay hubaashii waxa uu yahay in loo baahan yahay xog cusboonaysiisan, lagu kalsoonaan karo oo ku salaysan cilmi baadhis qalalaasuhu wuxuu doono ha ahaadee. Wakhtiga, cilmi baadhis dhanka tallaalka ah ayaa si dhakhso ah oo deeqsinimo ku jirto loo maal galiyay, iyadoo dunidu iskaashanayso. Iyadoo ay sidaa tahay, qalalaasahan safmarku waxa uu mar labaad caddeeyay fahmidda dhaqanka dadka iyo bulshadu sida ay mihiimka ugu tahay maaraynta qalalaase, tanoo ay macneheedu tahay in bani'aadamnida iyo , guud ahaan, cilmi baadhistu, ay tahay aasaaska gaadhista go'aan wax ku ool ah oo xakamaysan.

Bulshada saynisyahanadu waa mid caalami ah caadi ahaan, waxayna caddaysay faa'idada ay tani leedahay iyadoo xalal badan uheshay qalalaasaha safmarka dunida aafeeyay. Dunidu waa mid si dhow isugu xidhan – dhaqaale ahaan, siyaasada ahaan iyo deegaan ahaanba – arrimahanina, iyagu, waa kuwo si dhow isugu xidhan. Finland waa inay door firfircoon ay ka qaadato iskaashiga adduun weynaha ayna kor uqaado ahaanshiyaheeda dardargeliye iskaashiga.

Waayo waxa jira noocyo badan oo qalalaaso ah, dhammaan looma maarayn karo iyadoo la raacayo qaab kaliya. Xalka ugu fiican ee la joogtayn karo ee baddalka taa u ahi waxa uu yahay bulsho la qabsi leh oo awood uleh inay xoojiso awoodeeda hal abuur iyadoo isugaynaysa dadaalada sayniska, dawlada iyo bulshada, kuwanoo dhammaan ushaqaynaya gaadhidda hadafyada horumar waara. ■

Qalloocsamaya, laakiin aan la jabin karin - Laga soo bilaabo dhicintaankii safmarka karoonafayras iyo samayntii u adkaysiga qalaalasaha ee Finland waa bayaan ay soo saareen koox khubaro ah oo ay isku keeneen Finnish academy of Science and Letters (la baahiyay 8.2.2021).

Xubnaha kooxdan khubarada ah: Anna Mauranen (chairperson), Eva-Mari Aro, Riitta Hari, Sirpa Jalkanen, Markku Kulmala, Arto Mustajoki, Risto Nieminen, Ilkka Niiniluoto, Kari Raivio, Jorma Sipilä and Kirsi Tirri

Xoghayayaasha kooxda khubarada ah: Pekka Aula, Jaakko Kuosmanen and Rosa Rantanen

Bayaanka waxa aad ka akhriyi kartaa oo aad kasoo dejisan kartaa ***www.acadsci.fi/kannanotto2021.pdf***

SUOMALAINEN TIEDEAKATEMIA
FINNISH ACADEMY OF SCIENCE AND LETTERS